



xawdkaygu wuxuu le`eg yahay intii bil socodkeeda, biyihiisu way ka cad yihiin caanaha, caraftiisuna way ka udug badan tahay miskiga

Cabdullahi Binu Camar Allaha ka rali ahaado isagiyo aabbihiye waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu yiri: xawdkaygu wuxuu le`eg yahay intii bil socodkeeda, biyihiisu way ka cad yihiin caanaha, caraftiisuna way ka udug badan tahay miskiga, weelashiisuna waa sida xidigaha samada, qofka ku caba waligii ma haraadayo.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu sheegay inuu maalinta qiyaame leeyahay xawd, dhererkiisu dhan yahay in loo socdo bil, balaciisuna intaasoo kale. Biyihiisuna ka cadaan badan yihiin caanaha. Caraftiisuna udgoon tahay kana carfoon tahay carafta miskiga. Kirliyadiisuna sida xidigaha samada oo kale u badan yihiin. Qofka kaga caba kirliyadaa xowdka waligii ma haraadayo.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65030>

